HADDA OO UU JIRO NIDAAM KA FIICAN IYO SHARCIGA CUSUB EE QALALAASAHA QOYSKA WAY KA SAHLAN TAHAY IN LAYIRAAHDO

BES NAGU FILAN

QALALAASAHA QOYSKA. BULSHADEENU IN KU FILAN WAY SOO MARTAY.

Dawlada Victoria waxay soo saartay shuruuc cusub si ay si ka fiican ugaga ilaaliso bulshadeena qalalaasaha qoyska oo ay uga dhigto kuwa ka masuulka ah inay wax ka qabtaan wixii ka yimaado falalkooda. Shuruucda cusub waxay daboolaysaa dhammaan noocyada qalalaasaha qoyska iyo xirriirada badan ee qoyska iyo xirriirada qoyska oo kale ah.

Haddii adiga ama qof aad taqaan ay heysato qalalaasaha qoysku, noocay doonto ha ahaatee, hadda way sahlan tahay in layiraahdo 'bes' nagu filan.

Waa maxay qalalaasaha qoysku?

Qalalaasaha qoysku waa dabeecad dhib badan oo ka dhacda marka qof uu u hanjabo ama uu ku kontoroolo xubin qoyska ka mid ah cabsi gelin. Waxaa ka mid noqon kara waxyeelo jireed, galmo, mid maskaxeed ama dhaqaale waxayna ku lug yeelan kartaa:

- si aan macquul ahayn u kontoroolisteeda qof iyadoo uu ka heysanayo lacagta uu ugu baahan yahay kharashaadka nolosha ee macquulka ah halkaas oo qofku uu ku tiirsan yahay iyaga taageeradooda lacageed.
- u hanjabaya inuu dhaawaco xubin kale oo qoyska ka mid ah ama xayawaanka la korsado si loo cabsi geliyo.
- ku jeesjeesid jinsiyadeed oo u keenaysa waxyeelo maskaxeed
- ka hor istaagaya la xirriirka xubnaha kale ee qoyska ama saaxiibo si uu u dhibaateeyo qofka.

Xiiraradee qoys ayey shuruucdaan cusubi daboolayaan?

Sharciyada cusub marka loo eego, qeexida qalalaasaha qoyska waxay daboolayaan tiro badan oo qoys iyo xirriirada qoyska oo kale ah, oo ay ku jiraan:

- lammaanaha isqaba
- lammaanaha kuwada jooga heshiis dhexdooda ah
- lammaanaha dhabta ah
- xirriirada khaniisyada iyo khaniisada
- waalidka iyo carruurta
- qaraabada
- qofka qaba iinta ee daryeelahooda kula jira xirriir ka qoyska oo kale

SHANTII DUMARABA HAL KA MID AH WAXAA WAXYEELEEYEY QALALAASAHA QOYSKA

Waa maxay Sharciga Ilaalinta Qalalaasaha Qoyska ee 2008?

Sharciga Ilaalinta Qalalaasaha Qoyska ee 2008 wuxuu soo saaray shuruuc cusub oo dhaqan galay Diiseembar 2008. Sharciyada cusub waxay ujeedadoodu tahay:

- inay ka dhigaan bulshadeena mid ammaan ka ah qalalaasaha qoyska
- ka dhigaan kuwa masuulka ka ah qalalaasaha qoyska in loo qabto dabeecadooda
- yareeyaan shilalka qalalaasaha qoyska ee bulshadeena dhexdeeda.

Shuruucda cusubi maxay micne ah oo ay u sameynayaan bulshadeeda?

Sharciga Ilaalinta Qalalaasaha Qoyska ee 2008 wuxuu:

- balaarinayaa qeexida qalalaasaha qoyska si ay ugu jirto waxyeelada maskaxeed iyo dhaqaale, iyo sidoo kale noocyada kale ee hanjabaada iyo dabeecada kontaroolida ah.
- siinayaa awood badan booliiska si ay si dhakhso ah uga jawaabaan oo wax uga qabtaan si wax ku ool leh qalalaasaha qoyska.
- u sahlayaa dhibanayaasha qalalaasaha qoyska inay wax ka bedelaan hababkooda kireysiga si ay ugu nagaadaan gurigooda haddii ay doonayaan.

HADDA OO UU JIRO NIDAAM KA FIICAN IYO SHARCIGA CUSUB EE QALALAASAHA QOYSKA WAY KA SAHLAN TAHAY IN LAYIRAAHDO

BES NAGU FILAN

- hagaajinayaa nidaamka Maxkamada si loogu dhiirigeliyo dhibanayaashu inay wax badan soo sheegaan, oo ay ka mid yihiin in la xanibo inay dambiilayaashu su'aalo ka weydiiyaan dhibanayaasha dhacdadaas.
- si fiican si loogu ilaaliyo dadka Victoria ee jilicsan.

QALALAASAHA QOYSKU WELIGEED MA AHA MID LA AQBALI KARO.

Sidee bay qalalaasaha qoysku u saameeysaa dadka Victoria?

Qalalaasaha qoysku waxay ku reebaysaa raad waxyeelo ah dhibanayeesheeda ama dembiilayaasheeda qalalaasaha qoyska, badiba qalalaasaha qoysku waxaa gala raga oo ka gala dumarka, carruurta iyo dadka kale ee jilicsan. Qalalaasaha qoyska:

- waa ta hogaaminaysa waxyaalaha keena dhimashada, iinta iyo jirada dumarka ee bulshadeena ee jira 15 ilaa 44, oo hal ka mid ah shantii dumaraba ay saameysay qalalaasaha qoysku.
- waa qodob ka mid ah boqolkiiba 52% kiisaska ilaalinta carruurta ee xaqiiqda loo helo. Carruurta goob jooga u ah qalalaasaha qoyska waxay noqon karaan kuwo nerfoos ah oo ka go'an dadka kale, oo dugsiga waxbarashadoodu xun tahay, ay ku adag tahay bulshaanimadu oo sidoo kale leh waxyeelooyin kale oo koritaan oo fara badan.

Maxay kale oo ay sameynaysaa dawlada Victoria si ay wax uga qabato qalalaasaha qoyska?

Dawlada Victoria waxaa ka go'an oo ay ugu talagashay in ka badan $75 milyan ilaa iyo 2005 si ay wax uga qabato qalalaasaha qoyska, oo ay ka mid tahay:

- maalgelinta barnaamijyada bedelaada dabeecada ragga.
- ilo macluumaad oo badan iyo tababar khaas ah oo la siiyo boliiska si ay si ka fiican ugu jawaabaan xaaladaha qalalaasaha qoyska.
- Maxkamado Hoose oo dhawr ah ayaa leh dad takhasus u leh qalalaasaha qoyska oo ay ka go'an tahay inay siiyaan taageero badan dhibanayaasha.

CAAWIMAAD WAA LA HELAYAA

Xaggee baan u doonan karaa caawimaad ama macluumaad dheeraad ah?

Haddii adiga, ama qof aad taqaanid, ay heysato qalalaaso guri, waxaa jira tiro badan oo adeegyo bilaash ah iyo taageero la helayo si laguu caawiyo.

Xubnaha bulshada ee ah dhibanayaasha qalalaasaha qoyska
(waxay helayaan Shaqaalaha ku hadla labada af ama Turjubaano haddii ay codsadaan):

Adeega Qalalaasaha Qoyska ee Dumarka Soo galootga ah 1800 755 988.

Dumarka iyo carruurta ay heysato qalalaasaha qoysku (waxaa la heli karaa turjubaano haddii la codsado):

Adeega Dhibaatada Qalalaasaha Qoyska ee Dumarka 1800 015 188.

Raga doonaya inay joojiyaan dagaalkooda iyo waxyeelada ay ku hayaan xubnaha qoyska
(waxaa la heli karaa turjubaano haddii la codsado):

Adeega U gudbinta Ragga 1800 065 973.

Khadka taleefanka ee Dhibanaha Dembiga (waxaa la heli karaa turjubaano haddii la codsado):

Wuxuu bixiyaa macluumaad, tallo iyo u gudbin dhammaan dhibanayaasha qalalaasaha qoyska.
1800 819 817 (Isniinaha ilaa Jimcayaasha 8 galabnimo ilaa 11 fiidnimo)

Xaaladaha degdega ah, had iyo jeer wac 000 wixii caawimo ah.

QOF WALBA XAQ BUU U LEEYAHAY INUU AMMAAN KU HELO GURIGIISA